

Mashruuca buundada I-5 ee dul marta SW 26th Avenue

Dhismuhu wuxuu bilaabmayaa Abriil 2023

ODOT waxay beddelaysaa I-5 bridge ee dul mara SW 26th Avenue waxayna hagaajinaysaa SW 26th Avenue

- SW 26th Avenue ee hoos mara I-5 ayaa si buuxda uga xiran baabuurta muddo sanad ah laga bilaabo gu'gani.
- Xidhitaanka buuxa ee toddobaadka dhammaadkiisa ee I-5 ee xagaaga 2024.

Booqo website-ka mashruuca si aad iskugu diiwaan geliso wixii macluumaad cusub ah:
bit.ly/swi-5repair

Internet-ka ka fiiri goobtayada dadka u furan 'open house':
odotopenhouse.org/i-5-over-sw-26th-avenue-project

Mashruuca buundada I-5 ee dul marta SW 26th Avenue

ODOT waxa ay hagaajinaysaa I-5 ee dul mara SW 26th Avenue oo ku yaala Portland si loo ilaaliyo kalsoonida sii socota ee dadka safarka ah. Waxaanu beddeli doonaa buundada hadda jirta oo lagu beddeli doonaa mid cusub, dhisme 'structure' la wanaajiyay iyo cusbooneysiinta SW 26th Avenue oo leh iftiin wanaagsan, laymanka baaskiilka/bushkuleetiga iyo waddooyinka lagu lugeeyo.

Fiiri gudaha si aad u akhrido wixii ku saabsan sida aanu u cusbooneysiinayno SW 26th Avenue.

Su'aalaha ama Faallooyinka?

Ellen Sweeney Arrimaha Bulshada
971-336-1249
Ellen.SWEENEY@odot.oregon.gov

Khadka dhawaqa: 503-276-7892

Website-ka Mashruuca: bit.ly/swi-5repair

For ADA Title II or Civil Rights Title VI accommodations, translation/interpretation services or for additional information call 503-731-4128, TTY (800) 735-2900 or use the statewide Oregon Relay Service: 7-1-1.

Para las adaptaciones, servicios de traducción/interpretación en conformidad con el Título II de la ADA o el Título VI de Derechos Civiles, o para obtener información adicional, llame al 503-731-4128, TTY (800) 735-2900 o use el Servicio de Retransmisión de Oregon en todo el estado: 7-1-1.

لملائمات قانون الأميركيين المصابين بإعاقة الباب الثاني أو الحقوق المدنية الباب السادس، أو لخدمات الترجمة أو لمزيد من المعلومات، يرجى الاتصال على 503-731-4128، أو للمبرقة الكاتبة 800-735-2900 أو استخدم خدمة ترحيل المكالمات في ولاية أوريغون: 7-1-1.

ADA Title II ama Xuquuqda Madaniga Title VI qorshayaasha, adeegyada turjumaada/fasiraada, ama wixii macluumaad dheeraad ah wac 503-731-4128, TTY (800) 735-2900 ama isticmaal Adeegyada Gudbinta Wararka: 7-1-1.

Dhismuhu wuxuu bilaabmayaa Abriil 2023

Baahida Mashruuca iyo Faa'iidada

ODOT waxa ay hagaajinaysaa Interstate 5 ee dul mara SW 26th Avenue oo ku yaala Portland si loo ilaaliyo kalsoonidiisa sii socota ee dadka safarka ah. Dusha sare ee waddada ayaa si aad ah u duugowday waxayna ku dhowdahay dhamaadkii cimigeeda ee waxtarka lahaa.

Mashruucani wuxuu joogteynayaa isku xirka waddada tooska ah 'freeway' ee muhiimka ah wuxuuna abuurayaa gaadiid raacis habsami leh oo loogu talagalay dadka safarka ah isaga oo sidoo kale kor u qaadaya heerka dhul gariirka loogu talagalay ee hadda jira.

Waxaanu beddeli doonaa buundada hadda jirta oo lagu beddeli doonaa mid cusub, dhisme 'structure' la wanaajiyay iyo cusbooneysiinta SW 26th Avenue oo leh iftiin wanaagsan, laymanka baaskiilka/bushkuleetiga iyo waddooyinka lagu lugeeyo. Waxaanu si dhow Xafiiska Gaadiidka ee Portland ugala shaqeynaynaa (PBOT) hagaajin lagu sameeyo SW 26th Avenue.

Beddelaada Buundada


Mashruucani waxaa lagu dhisayaa saddex dhisme 'structure' oo ka hooseeya buundada hadda jirta ee I-5, ka dibna waxaa dib loo dhisayaa waddada kor ku taala inta lagu jiro **xiritaanka buuxa ee toddobaadka dhammaadkiisa ee I-5 kaasi oo ah labada jhaba ee sanadka 2024.**

Dhida dhismaha 'structure' cusub oo leh habkani wax loo wajahayo wuxuu hoos u dhigayaa kharashaadka mashruuca, wuxuu soo gaabinayaa wakhtiga dhismaha, wuxuu fududeynayaa saameynta isku socodka gaadiidka, wuxuu leeyahay saameynta deegaanka oo yar wuxuuna wanaajiyaa badbaadada shaqaalaha iyo dadka safraya.

Inta ay shaqaaluhu ka dhisayaan dhismaha 'structure' cusub, **SW 26th Avenue wuxuu ka xirnaan doonaa baabuurta inta u dhaxaysa I-5 iyo Barbur Boulevard qiyaastii muddo sanad ah.**

Fiiri gudaha wixii macluumaad faahfaahsan ee ku saabsan hagaajinta soo socota ee SW 26th Avenue, saameynta isku socodka gaadiidka, aagga la xidhayo iyo khariidada meelaha laga leexanayo ee deegaanka.

Khariidada Goobta Mashruuca



La kulan Kooxda Mashruuca oo Ogow Waxyaabo Dheeraad ah!

Kaalay oo kafeega iyo macmacaanka deegaanka kula raaxeyso kooxda mashruuca oo ogow waxyaabo dheeraad ah oo ku saabsan hagaajinta soo socota ee I-5 iyo SW 26th Avenue.

Waxaanu dadka la wadaagi doonaa faahfaahinta mashruuca ee ku saabsan dhismaha 'structure' cusub iyo wanaajinta dadka jidka lugaynaya iyo baaskiilka. Aanu halkaasi kugu aragno!



Soo bandhiga Mashruuca


Sabtida, Abriil 22, 10 subaxnimo – Duhurka

Spring Garden Park
3332 SW Spring Garden Street
Portland, OR 97219

Hagaajinta SW 26th Avenue

Waxaanu hagaajinaynaa SW 26th Avenue oo leh iftiin wanaagsan, laymanka baaskiilka/ bushkuleetiga iyo waddooyinka lagu lugeeyo. Sida sawirka midigtu uu muujinayo:

- Dhinacyada dhismaha ayaa la buuxin doonaa, oo la mid ah muuqaalka jidka hoosta ka daloola 'culvert' ama tunnel.
- Dhismaha 'structure' ayaa si fiican iftiim u yeelan doona oo loogu talagalay badbaadada dadka ku dhex safraya, iyada oo lix ilaa sideed nal gudaha ku yaalaan.
- Waxaanu ku beeri doonaa dhirta Boston Ivy (oo ah mid aan faafin) oo ku taala bannaanka dhismaha si ay gacan uga geysato dabcinta muuqaalka shubka, oo ugu ekaato meelaha cagaaran ee u dhow, oo loo joojiyo sawirrada 'graffiti'.
- Dadka ku lugeeya, baaskiilka/bushkuleetiga ama shay taayiro leh 'rolling' ku dhex wata aagga waxay yeelan doonaan meelo ballaaran oo loogu talagalay safarka, oo ay ku jiraan waddooyinka lagu lugeeyo iyo laymanka baaskiilka/bushkuleetiga oo la wanaajiyay.
- Waxaanu hagaajin doonaa isgoyska SW 26th Avenue iyo SW Barbur Court oo leh kaabado socodka sahla oo cusub 'curb ramps', laynka baaskiilka/bushkuleetiga iyo meesha laga gudbo 'crosswalk' oo muuqaal sare leh.



Sawirka hagaajinta lagu sameynayo SW 26th iyo dhismaha 'structure' cusub oo laga fiirinayo dhanka SW 26th Avenue ee eegaya koonfur-bari.

Wada shaqeyn Lala leeyahay PBOT

ODOT waxay Xafiiska Gaadiidka ee Portland kala kaashaneysaa muuqaalada cusub ee aan dhisayno ee ku yaala SW 26th Avenue. Tani waxaa ka mid ah isku xirka dariiq isticmaalka badan leh 'multiuse' oo cusub oo ay PBOT dhisayso iyada oo qayb ka ah Mashruuceeda Buuxinta Waddada Lagu lugeeyo ee Aagga OR 99W/SW Barbur Blvd iyo ku darista laymanka baaskiilka/bushkuleetiga oo cusub oo ku yaala SW Barbur Court, wanaajinta sii socodka iyo kaabayaasha baaskiilka/bushkuleetiga iyo isku xirka ee degaanka.



Hagaajin lagu sameeyo isgoyska SW 26th Avenue iyo SW Barbur Court.



Booqo website-ka mashruuca wixii macluumaad dheeraad ah. bit.ly/swi-5repair

Saameynta Dhismaha

Dhismuhu wuxuu bilaabmi doonaa Abriil 2023 wuxuuna socon doonaa ilaa xagaaga 2024.

Saameynta SW 26th Avenue

Laga bilaabo gu'ga 2023, **SW 26th Avenue ayaa si buuxa uga xirnaan doona baabuurta laga soo bilaabo I-5 ilaa Barbur Boulevard hoostiisa qiyaastii muddo sanad ah.** SW Barbur Court wuxuu sii ahaan doonaa mid sii furan. Ganacsiyada ku yaala SW Barbur Court iyo guryaha ku yaala SW 26th Avenue waxay noqon doonaan kuwo la geli karo.

Dadka lugeynaya, baaskiilka/bushkuleetiga ama shay taayiro leh 'rolling' wataa waxay yeelan doonaan gelitaan ah I-5 hoostiisa inta badan mashruuca. Dadka safraya ee saaran bushkuleetiga/baaskiilka waxay u baahnaan doonaan in ay ku dhex lugeeyaan aagga mashruuca.

Haddii aan u baahanahay inaan si buuxda uga xirno SW 26th Avenue ee hoos mara I-5 dadka lugeynaya, baaskiilka/bushkuleetiga ama shay taayiro leh 'rolling' wata, waxaanu bixin doonaa basas si aanu dadka ugu qaadno dhinaca kale ee SW 26th Avenue.

Saameynta Interstate 5


- Xiritaannada hal layn ee waqtiga habeenkii ee I-5 kaasi oo ah labada jihaba laga soo bilaabo 11 habeenimo ilaa 5 subaxnimo ee maalmaha shaqada iyo laga soo bilaabo 11 habeenimo ilaa 8 subaxnimo oo ah maalmaha shaqada.
- Ilaa 10 xiritaan jiho ee waqtiga habeenkii ee I-5 (shan waqooyi u socda iyo shan koonfur u socda) laga bilaabo 11 habeenimo ilaa 5 subaxnimo.
- Xagaaga 2024, xiritaanka buuxa ee toddobaadka dhammaadkiisa ee I-5 oo ilaa 4 mayl ah muddo ka badan hal toddobaadka dhammaadkiisa ah (habeenka Jimcaha ah ilaa subaxnimada Isniinta). Inta lagu jiro xiritaannadani waxaa jiri doonaa meelaha laga leexanayo oo gobol ah oo la isticmaalayo I-205 iyo OR 217 iyo meelaha laga leexanayo ee deegaanka oo calaamad leh. Marka aanu ku soo dhawaano xiritaanka, waxaanu wadaagi doonaa macluumaad faahfaahsan iyo khariidada meelaha laga leexanayo.
- Ilaa 30 xiritaannada laba layn ee waqtiga habeenkii ee I-5 kaasi oo ah labada jihaba laga soo bilaabo 10 habeenimo ilaa 5 subaxnimo si toos ah ka hor iyo ka dib xiritaanka toddobaadka dhammaadkiisa ee I-5 ee loogu talagalay shaqada diyaarinta, calaamadeynta waddada 'striping', iyo dhigista xayndaabka geesaha waddada 'shoulder barrier'.

Dhawaqa Habeenkii

Waxaanu shaqada waqtiga habeenkii ku soo koobaynaa 90 habeen si uu dhawaqa mashruucu mid qashqashaad yar ugu noqdo xaafadda ku xeeran. Inta lagu jiro habeenadani xaafaduhu waxaa dhici karta in ay maqlaan dhawaqa dhismaha. Waxaanu adeegsan doonaa tallaabooyin lagu yareynayo dhawaqa si hoos loogu dhigo dhawaqa. Icticmaal **khadka dhaqawa ee waqtiga habeenkii oo ah 24/7** si looga hadlo walwalka dhanka dhawaqa. 503-276-7892.



SW 26th Avenue ayaa si buuxda uga xirnaan doona baabuurta laga soo bilaabo I-5 ilaa Barbur Boulevard hoostiisa qiyaastii muddo sanad ah. SW Barbur Court wuxuu sii ahaan doonaa mid sii furan.



SW Barbur Court wuxuu sii ahaan doonaa mid sii furan. Ganacsiyada ku yaala SW Barbur Court iyo guryaha ku yaala SW 26th Avenue waxay noqon doonaan kuwo la geli karo.